PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000
Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Ku dhawaaqida Maamulaha Cusub ee Dugsiga Sare ee Cleveland ee Ayesha Freeman

Juun 2017-ka.

Bulshada Dugsiga Sare ee Cleveland ee Qaaliga ah,

Ku dhawaaqida Maamulaha Cusub ee Dugsiga Sare ee Cleveland ee Ayesha Freeman

Waxaa farxad weyn ii ah in aan ku dhawaaqo in Ayesha Freeman ay tahay maamulaha cusub ee Dugsiga Sare ee Cleveland. Ayesha haatan waa maamule ku xigeenka Dugsiga Sare ee Wilson, oo ah boos ay soo haysey ilaa 2012-kii.

Ayesha waxay shahaadeeda jaamacadeed ee taariikhda ka qaadatay Kulliyadda Vassar, iyada oo shahaadadeeda Master-ta ee waxbarashada ka qaadatay Jaamacadda Michigan isla markaana ruqsadeeda maamulka ka qaadatay Jaamacadda Gobolka Portland "Portland State University". Waxay macallinka cilmiga bulshada ee dugsiga sare ahaan uga soo shaqaysay muddo saddex sano ah Dugsiga Degmada Cherry Creek ee ku yaala Denver, Colorado ka dib markii ay ka qalin qabisay Jaamacadda Michigan. Ka dib waxay markaa Oregon u soo guurtay 2000-kii halkaasi oo ay muddo lix sano ah cilmiga bulshada ee dugsiga sare ka dhigaysay Dugsiga Sare ee Sunset. Ayesha ka dibna waxay maamule ku xigeen ka soo noqotay Dugsiga Sare ee Mountain View ee ku yaala Vancouver; iyada oo muddo shan sano ah maamule ku xigeen ka soo noqotay Dugsiga Sare ee Gresham; iyo muddo san shano ah oo ay kaaliyaha maamulaha ka soo noqotay Dugsiga Sare ee Wilson.

Waayo-aragnimadeeda 20 sano ah ee ay u leedahay macallinimada iyo maamulka ee fahamka dugsiyada sare ee dadweynaha ayaa siinaya taariikhda laga maarmaanka u ah in ay sii wado dhabbihii guusha ee Cleveland. Waxaa ka go'an sinnaanta xagga isirka iyo isku xirnaanta dugsiga. Intii ay joogtay Wilson, Ayesha waxay fududaysay Kooxda Sinnaanshaha ee dugsiga iyada oo horumarisay hoggaanka macallinimo ee qaybtan. Waa qof khibrad u leh manhajka, waxbarashada iyo qiimeynta isla markaana aaminsan in doorkeeda koowaad uu yahay in ay taageerto isla markaana dhiirigeliso wax baridda iyo waxbarashada fasallada dugsiga sare. Ayesha waxay rabtaa in Cleveland sii wado in ay ahaato meel dhammaan ardayda iyo qoysasku dareemaan in la soo dhawaynayo. Si taasi looga dhigo mid suurta gal ah, waxay doonaysaa in ay sanadaha soo socda si dhow ula shaqayso macallimiinta iyo shaqaalaha, ardayda cusub, qalin jabiyayaasha, PTA iyo dhamaan bulshada Clevend.

Ayesha waxay ku dhex jirtaa oo ay mashquul ku tahay dunida waxbarasho ee shaqadeeda iyo labadeeda gabdhood ee dhallinyarada ah, oo dhigta dugsiyada PPS. Waxay jeceshahay alwaaxa barafka, baaskiilka/bushkuleetiga, iyo boorsada dhabarka ee buuraha oo ay inta badan la aado qoyskeeda iyo saaxiibadeed marka ay suurta galka tahay. Ayesha waa taageero si fiican oo taageera, soo bandhiga iyo suugaanta, waxayna aqoosan tahay muusikada tooska ah, filimada sheekooyinka ah, sheekooyinka filimada sayniska iyo cuntooyinka khudrada. Inta u dhaxaysa kuwaani, waxay xiisaysaa qoridda iyo akhriska sheekooyinka aan beenta ahayn iyo wararka caalamiga ah.

Fadlan igula soo biira tahniyadda Ayesha ee shaqadeeda cusub ee maamulaha Dugsiga Sare ee Cleveland!

Bob McKean
Kormeeraha Guud ee Ku meel gaarka ah

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.